

Waa maxay daawada kahor fidida caabuqa ee Prophylaxis ka lagu daaweyo COVID-19?

Waa daawo loo sameeyay inay fayraska kahor istaagto inuu ku xirmo uuna galoo unugyada jirka qofka. Tani waxay jirka ka difaacysaa cudurka.



Dadka jira 12 sano iyo ka wayn ayaa u qalmi kara daawada kahortaga caabuqa ee prophylaxis oo kahortagta COVID-19 haddii dadku:

- Ay leeyihiiin ugu yaraan miisaan dhan 88 bawn (40kg).
- Aysan hadda qabin caabuqa COVID-19.
- Nidaamkooda difaaca jirku uu liito illaa xad ama si aad ah.
- Uu kuu diido dhakhtarkaagu inaad qaadato talaalka COVID-19.

Miyaan qaadan karaa daawada kahortaga fayraska ee prophylaxis si aan uga hortago COVID-19 haddii aan horay u qaatay talaalka COVID-19?

Daawada kahortaga fayraska ayaa yarayn karta jawaabta difaaca jirkaagu ka bixiyo talaalka COVID-19. Waa inaad sugtaa ugu yaraan labo asbuuc kadib talaalkaaga COVID-19 si aad u qaadato daawada.

Sidee ayaan u qaadanaya?

Waxaad heli doontaa 2 cirbadood oo kaladuwani (daawo lagu duraayo mucda hoose ee murqahaaga).

Waa meeqa qarashka daawadu?

Daawadu waa lacag la'aan waxaana bixinaysa Dawlada Federaalka ah. Dhakhtar kasta ayaa qaadi kara qarashka bixinta daawada oo laga qaadi doono qarashka shirkadaada caymiska ayadoo bukaanku dhiibaayo inta kusoo aada.